

Tilmaamaha Maaskarada Afxirka Inta lagu jiro COVID-19

Soo-koobidda Isbadelada Maarso 14, 2022

- Loo cusboonaysiiyay si loo waafajiyo isbaddelada [Amarka Afxirka ee Xoghayaha Caafimaadka](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) iyo [Wareegtada Guddoomiyaha](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya)

Hordhac

Marka aad xirato afxirka, waxaad gacan ka gaysanaysaa difaaca dadka kale ee kuu dhaw iyo sidoo kale nafsadaada. Iyada oo laga jawaabayo masiibadaan, waxa aan ogaanay in ay jiraan xilliyada iyo goobo halkaas oo afxirka uu si weyn u yareyn karo ugudbinta qofka COVID-19 ee qofka kale, waxey badbaadineysaa nafaf waxayna caawineysaa in dhaqaaluhu si amni iyo xikmad leh dib ugu furmo. Xeeladaha kahortagga heerarka ah sida la socoshada tallaaladi udambeeyey iyo xirashada afxirada waxay gacan kageysan karaan kahortagga xanuunka daran iyo yareynta culeyska ku imaan kara nidaamka daryeelka caafimaadka – gaar ahaan marka heerarka iskugudbinta ay aad u sarreeyaan.

Sida ay qabto Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarunta Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada) qaar kamid ah afxirrada iyo qalabka neefta laga qaato ee wajiga lagu xidho ayaa bixiya heerar sare oo difaac ah marka loo eego kuwa kale, qaarna waxaaba laga yaabaa inay adag tahay in loo dulqaato ama loo xidho si joogto ah marka loo eego kuwa kale. Waxaa aad muhiim u ah inaad xirato afxir si fiican kuula eg ama qalabka neefta laga qaato ee wajiga lagu xidho oo sax ah oo aanan dhib kugu ahayn oona kusiinayo difaac wanaagsan. Macluumaad Dheeraad ah waxaa laga heli karaa bogga webseedka CDC ee [noocyada afxirrada iyo qalabka neefta laga qaato ee wajiga lagu xirto](#).

Gaashaanka wajiga oo leh dhajiska ayay isticmaali karaan dadka kujira xaaladaha korniinka, habdhaqanka, ama xaaladaha caafimaad taasoo ka celinaysa in ay xirtaan afxirka. Gaashaanka wajiga oo leh maro dhajis ah ayaa sidoo kale la isticmaali karaa; oo ay ku jiraan carruurta ku jirta xanaanada caruurta, xero maalmeedka, iyo goobaha K-12 haddii aysan xiran karin afxir si fiican ula eg. Ka eeg tilmaanta Department of Health (DOH, Waaxda Caafimaadka) si aad u hesho macluumaadka kusaabsan afxirka ee [Dugsiyada K-12, Daryeelka Carruurta, Waxbarashada Dhallaanka, Horumarinta Dhallinyarada, iyo Barnaamijyada Kaamamka Maalinti ah](#) (ku qoran Af-Soomaali). Intaa waxaa dheer, Ka eeg qeybta CDC ee [Tixgelinada loogu talagalay kooxaha gaarka ah ee dadka](#) si aad u hesho macluumaad dheerad ah. DOH kuma talineyso in la xirto maaskarada leh duleelada laga neefsado ama hawo mareenka, ama masar ama calal kaligii.

[Goobta shaqada](#), noocyo gaar ah oo maaskaro ama qalabka neefta ayaa loo baahan karaa. Qalabka neefta laga qaato ee wajiga lagu xidho ee leh duleelada neefsashada ayaa la isticmaali karaa iyadoo la raacaayo tilmaamaha ay daabacday Washington State Department of Health (DOH, Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington) iyo [Washington State Department of Labor & Industries \(L&I, Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha ee Gobolka Washinton\)](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya).

Fadlan booqo [bogga webseedka DOH wixi kusaabsan afxirrada](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) si aad u hesho liiska su'aalaha kusaabsan afxirka ee inta badan la isweydiiyo.

Waajibaadka jira iyo Amarada Caafimaadka ee Hadda

Amarada dadweynaha ee hoos kuqoran ayaa ooga baahan dadka inay kuxirtaan afxirka/maaskarada goobaha qaar oo ay kujiraan:

- [Goobaha Daryeelka Caafimaadka](#)
- Xarumaha Asluubta iyo Jeelasha (xabsiyada dadka waaweyn iyo jeelasha)
- [Gaadiidka Dadweynaha](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya)

Waaxda Amarka Caafimaadka ee Gobolka Washington

[Secretary of Health Mask Order \(Amarka Afxirka ee Xoghayaha Caafimaadka\)](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) wuxuu ooga baahan yahay dadka reer Washington inay gafuur xirka [goobaha daryeelka caafimaadka](#) iyo goobaha xabsiyada dadka waaweyn iyo jeelasha, iyadoo aan loo eegin xaalada qofka inuu tallaalan yahay iyo in kale walow ay jiraan dad laga reebay ama laga dhaafay oo kooban. Dadka ayaa si shakhsi ah musuul oga ah inay u hoggaansamaan amarka; Hase yeeshee, mehradaha ganacsiyada ayaa sidoo kale leh mas'uuliyada ay ku meel marinayaan arrintaan shaqaalahooda iyo macaamiishooda. Fadlan ka eeg hoos amarada si aad u hesho macluumaadka dheeraadka.

Amarka Federaalka

Shuruudaha looga baahan yahay gaadiidka dadweynaha ayaa laga helayaa [Centers for Disease Control and Prevention order \(amarka Xarunta Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada\)](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya). Amarkan ayaa ka dalbanaya rakaabka saaran dhammaan gaadiidka dadweynaha iyo xarumaha gaadiidka oo ay kujiraan laakiin aan ku koobneyn diyaaradaha, maraakiibta, doomaha, tareenada, tareenada dhulka hoostiisa mara, basaska, taksiyada, iyo gaadiid raacitaanka la isla wadaago. Shaqaalaha gaadiidka bulshada waa inay u sheegaan in ay qasab tahay in safareyda oo dhan afxir xirtaan marka ay gaadiidka korayaan, kadagayaan, iyo wakhtiga safarka. Macluumaad Dheeraad ah ayaa laga heli karaa [bogga webseedka CDC ee Maamulka Sharciga](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya).

CDC ma ooga baahno dadka saaran inay afxirka kudhex xirtaan basaska ama caasiyada dushooda ee ay maamulaan nidaamyada dugsiyada K-12 ee dawlada ama kuwa gaarka loo leeyahay ama daryeelka dhallaanka ee hore iyo barnaamijyada waxbarashada/daryeelka carruurta (ECE). Sida ay go'aan sadaan, nidaamyada dugsiyada iyo barnaamijyada ECE ayaa dooran kara inay dadka oga baahdaan inay afxirka kuxirtaan basaska ama caasiyada dushooda. Fadlan ka eeg tilmaanta DOH ee [Shuruudaha iyo Hagitaanka lagu Yareynayo](#)

[Iskugudbinta COVID-19 ee Dugsiyada K-12 dhexdooda, Daryeelka Carruurta, Waxbarashada Dhallaanka, Horumarinta Dhallinyarada, iyo Barnaamijyada Kaamamka Maalinti ah](#) (ku qoran Af-Somali) si aad u hesho macluumaad dheerad ah oo kusaabsan ku safridda gaadiidka basaska.

Wareegtada Guddoomiyaha Gobolka Washington

Macluumaadka ku saabsan mas'uuliyadaha iyo rajooyinka laga qabo ganacsiyada ku lugta leh macaamiisha iyo shaqaalaha ayaa lagu sheegay [Wareegtada 20-25.19 COVID-19 Washington Diyaar ah ee Guddoomiyaha](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) iyo [Wareegtada 21-08 – Badbaadada Shaqaalaha](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya).

Wareegtada Guddoomiyaha iyo Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ee Gobolka Washington

Inkastoo afxirka aanan looga baahneyn inta badan goobaha shaqada sida kucad wareegatada Guddoomiyaha ee kor kuxusan, mehradaha ganacsiga ee gaarka loo leeyahay ayaa wali dadka ooga baahan kara afxiradda haddii ay sidaas doortaan. Fadlan ixtiraam [shuruucda goobta](#). Intaa waxaa dheer, sida kucad [Wareegtada Guddoomiyaha ee Badbaadada Shaqaalaha](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya), qaar kamid ah shaqaalaha ee qaba haliso gaar ah oo caafimaad oo khatar ku ah naftooda ama la nool dadka halista weyn ugu jira inuu kudhaco xanuunka COVID-19 ee aadka u daran ayaa wali ubaahan kara, ama dooran kara inay xirtaan afxirka; shaqaalaha ayaa xaq u leh inay afxir xirtaan si ay u ilaaliyaan naftooda, qoysaskooda iyo bulshadoodaba. Sanadki 2021 Golaha Sharci Dejinta ayaa meel mariyey Xeerka Beddelka Guurtida 5254, kaasoo ilaalinayo xuquuqda qofka shaqaalaha ah ee uu ku xiranayo afxirka inta lagu guda jiro gurmadka caafimaadka dadweynaha, ilaalintana waxaa hadda lagu xeeriyey [Revised Code of Washington \(RCW, Xeerka Washington ee dib loo eegay\) 49.17.485](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya). Fadlan ka eeg [Shuruudaha iyo Tilmaamaha looga Hortagayo COVID-19](#) ee L&I (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) iyo [Su'aalaha Guud ee COVID-19 ee Ku Aadan Shuruudaha Waji Daboolka iyo Afxirka ee Shaqaalaha](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan goobaha shaqada.

Hay'adaha iyo Saraakiisha Caafimaadka Dadweynaha ee Maxalliga ah

Saraakiisha caafimaadka deegaanka waxa ay leeyihiin awoodda ay ku meel marin karaan amarada caafimaadka si ay u xakameeyaan ogana hortagaan faafitaanka cudurka ayaga oo adeegsanaya awoodooda. Amaradaan ayaa laga yaabaa in ay ka adagyihiin marka loo eego amarada gobolka, laakiin kama fududaan doonaan. Ka xaqiiji [maamulka caafimaadka maxalliga](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) kadibna raac dhammaan amarada caafimaadka udagsan deegaankaas.

Talo Soojeedinada

Iyadoo macluumaadka kor kuxusan ay sheegayaan shuruudaha udagsan ku xirashada afxirka goobaha gaarka ah dhexdooda ee waqtigan, macluumaadka soo socdo waxay sheegayaan talooyinka caafimaadka dadweynaha ee guud si loo tixgeliyo.

Tallooyinka Afxirka ee Isku Imaatinka Goobaha Aanan Ahayn Daryeelka Caafimaadka

Kuxirashada afxirka goobaha gudaha ah dhexdooda ayaa lagu talinayaa marka ay suurtagal katahay goobaha soo socdo: Fadlan hoos ka eeg tilmaanta qeybta gaarka u ah.

- [Goobaha bixiyaasha adeegga hoy' la'aanta](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya)
- [Goobta ganacsiga badda](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) (sida, [maraakiibta cuntada badda ee ganacsiga](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya), maraakiibta xamuulka, maraakiibta dalxiiska)
- [Goob shago oo ciriiri ah](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) oo kala fogaansho jireed aysan suurtagal ahayn sababa la xiriira dabeecadda shaqada, sida bakhaarada, warshadaha, warshadeynta cuntada iyo goobaha warshadaha habbeynta hilibka
- Meelaha lagu nool yahay ee la wadaago ee isku imaatinka goobaha lagu nool yahay (aysan kujirin qolalka jiiifka) oo ay kujiraan xarumaha u siideynta shaqada ee maxaabiista, guriyeynta kumeel gaarka ah, dhaqancelinta dhalinyarada, ama goobaha xabsiyada, iyo guryaha kumeel gaarka ah ee shaqaalaha
- Gudaha goobaha halkaas oo dadka kuxiran gudaha xabsiyada dadka waaweyn, jeelasha dadka waaweyn, goobaha dhaqancelinta dhalinyarada, goobaha xabsiyada dhalinyarada ay joogaan (sida, qolalka maxkamada).

Dadka ku nool ama ka shaqeeya goobaha kor lagu soo xusay waa inay raacaan isla talooyinka dadweynaha ee guud marka aysan joogin goobahaan (sida, marka ay banaanka joogaan ee bulshada dhexdeeda). Maamulka caafimaadka ee dadweynaha ayaa ubaahan kara in afxirka loo isticmaalo xaalado gaar ah, sida faafitaanka xanuunka.

Dhismayaasha aanan ahayn kuwa daryeelka caafimaadka ee dadku iskugu yimaado (sida ganacsiyada iyo ururada) ayaa dalban kara in afxirka lagu xirto goobahooda. Dhismayaashaan waa inay tixgeliyaan dhammaan arrimaha soo socdo marka ay go'aan kagaarayaan in goobahooda afxirka looga baahdo iyo inkale:

- Nuglaanta dadka goobta kusugan
 - Dadka aanan [la soconin](#) tallaaladi COVID-19 ee ugu dambeeyey ayaa halis dheeraad ah kasoo wajahdaa COVID-19 iyo kudhicidda xanuunka aadka u daran
 - Dadka qaba [xaalado caafimaad oo gaar ah](#) ayaa halis weyn ugu jira inuu kudhaco xanuunka aadka u daran ee COVID-19
- Tayada hawo soogalista ee goobta dhexdeeda - ka eeg [Hawo soogalista iyo Tayada Hawada ee Lagu Yareynayo Isugudbinta COVID-19 \(wa.gov\)](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) iyo [Hawo soogalista Dhismayaasha | CDC](#) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo xulashooyinka hawo soogalista, oo ay kujiraan goobaha leh nidaamyada faltarada hawada ee HVAC iyo kuwa aanan lahaynba
- Awooda ay dadka u leeyihiin inay jir ahaan ku kala fogaadaan goobta
- Cudur dillaaca COVID-19 ee laga shakiyey ama la xaqiijiyey ee kajira goobta – kuxirashada afxirka goobaha gudaha ayaa si xoogan loogu talinayaa marka uu jiro faafitaanka cudurka oo kadillaacay gudaha goob la iskugu yimaado oo aanan ahayn goobta daryeelka caafimaadka

- Marka heerarka faafitaanka cudurka uu aad ugu sarreeyo bulshada dhexdeeda, CDC iyo DOH waxay ku talinayaan in dhammaan dadka ay ku xirtaan afxirka gudaha goobaha, iyadoo aanan loo eegin xaalada tallaalka ee qofka inuu tallaalan yahay iyo inkale. Ka eeg [Heerarka Faafitaanka COVID-19 ee Bulshada Dhexdeeda ee CDC](#)

Dhismayaashaan waa inaysan udiidin shakhsiyaadka inay xirtaan afxirka haddii ay sidaasi doortaan. Hoos ka eeg tallooyinka afxirka shakhsi ahaaneed iyo tixgelinada kusaleysan halista.

Tallooyinka afxirka shakhsi ahaaneed

Dadka leh astaamaha, laga helay caabuqa, ama udhawaaday qof qabo COVID-19 waa inay xirtaan afxir, si waafaqsan [Waxa aad sameyneyso haddii lagaa helo COVID-19 \(ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya\)](#), [Waxa la sameynayo haddii ay dhacdo inaad udhawaatay qof qaba COVID-19 \(ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya\)](#), iyo [Geedka Go'aanka Astaamaha COVID-19 \(ku qoran Af-Somali\)](#). Shakhsiyaadku waa inay xirtaan afxirka haddii looga dalbado goobta ay kusugan yihiin. Ka eeg qeybta [Wajjibaadka jira iyo Amarada Caafimaadka ee Hadda](#) si aad u ogaato shuruudaha.

Haddii xitaa xaaladaha kor kuxusan aysan ku khuseyn, dadku waxay xiran karaan afxirka iyadoo ay ku xiran tahay doorbidida shakhsiyeed, oo lagu wargeliyey heerka khatarta shakhsi ama bulsho. Shakhsiyaadku waa inay tixgeliyaan arrimaha soo socdo marka ay go'aansanayaan inay xirtaan afxir iyo inkale:

- Heerka xaalada is-tallalidda shakhsiyeed iyo heerka xaalada is-tallalida qoys, asxaab, iyo kuwa kale ee ku xeeran iyaga - Dadka aanan [la soconin](#) tallaalka COVID-19 ee ugu dambeeyey ayaa halis dheeraad ah kasoo wajahdaa COVID-19 iyo kudhicidda xanuunka aadka u daran
- [Xaaladaha caafimaadka](#) ee shakhsiyeed iyo xaaladaha caafimaadka qoyska, asxaabta, iyo kuwa kale ee ku xeeran iyaga ee kordhinaya halista xanuunka aadka u daran ee COVID-19
- Astaamaha goobta aad kusugan tahay (sida, meel dad kabuuxo, meel hawo fiican aanay soogaleynin)
- Marka heerarka faafitaanka cudurka uu aad ugu sarreeyo bulshada dhexdeeda, CDC iyo DOH waxay ku talinayaan in dhammaan dadka ay ku xirtaan afxirka gudaha goobaha, iyadoo aanan loo eegin xaalada tallaalka ee qofka inuu tallaalan yahay iyo inkale. Ka eeg [Heerarka Faafitaanka COVID-19 ee Bulshada Dhexdeeda ee CDC](#)

Kheyraad iyo Macluumaad dheeraad ah oo Ku saabsan cudurka COVID-19

Hel xogtii ugu danbaysay oo ku saabsan [Xaalada hadda ee COVID-19 ka jirta Washington \(Af-Somali\)](#), [Wareegtada Gudoomiye Inslee \(ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya\)](#), [astaamaha xanuunka \(ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya\)](#), [sida uu ku faafo \(ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya\)](#), iyo [Sida iyo goorta ay tahay dadku inay isbaaraan \(ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya\)](#). Arag [Su'aalaha badanaa La iswaydiiyo](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) si aad u hesho xog dheeraad ah.

Qofka isirkiisa/haybtiisa ama wadanka uu u dhashay, Kama dhigayaan mid khatar wayn ugu jira, inuu ku dhaco caabuqa COVID-19. Si kastaba ha noqotee, xogta ayaa sheegeysa in bulshooyinka aan cadaanka ahayn ay si aan kala sooc lahayn u saameeyey COVID-19- tan waxaa ugu wacan saamaynta cunsuriyadda, iyo gaar ahaan, cunsuriyadda qaabdhismeedka, taas oo ka dhigaysa kooxaha qaar fursado yar oo ay ku badbaadin karaan naftooda iyo bulshadooda. [Takoorku ma caawin doono la dagaalanka cudurka](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya). La wadaag macluumaadka saxda dadka kale si aysan ufaafin xanta iyo macluumaadka khaldan.

- [Gobolka Washington Waaxda Caafimaadka ee Faafida Korona Fayras cusub ee 2019 \(COVID-19\)](#) (Soomaali)
- [Gurmadka Gobolka Washington ee Korona Fayras \(COVID-19\)](#) (ku qoran Af-Soomaali)
- [Raadi Waaxda Caafimaadka ee Deegaankaaga ama Degmada](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya)
- [CDC Korona fayraska \(COVID-19\)](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya)
- [Sida Loo Fududeeyo Helitaanka, Afxirka ay adeegsan karaan Dadka Dhagoolka ah \(HSDC\)](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya)

Ma qabtaa su'aalo dheeraad ah? Ka wac khadkeena Macluumaadka COVID-19: **1-800-525-0127** Isniin – 6 a.m. illaa 10 p.m., Talaado – Axada iyo [maalmaaha fasaxa ah ee gobolka](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya), 6 a.m. illaa 6 p.m. Haddii aad u baahan tahay adeegga turjumaada, **Riix #** markay kuu jawaabaan kadibna **dheh Soomaali**. Si aad u hesho jawaabaha su'aalo ah oo la xariira caafimaadkaaga, baaritaanka cudurka COVID-19, ama natiijooyinka baaritaanka, fadlan la xariir dhakhtarkaaga.

Si aad dukumiintigaan oo qaab kale ah u codsato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 ([Washington Relay](#)) ama iimeel udir civil.rights@doh.wa.gov.

Lifaaqa dheeraadka ah ee A: Erayo Bixinta

Goobta Daryeelka Caafimaadka

Sida kucad [Secretary of Health's Mask Order \(Amarka Afxirka Xoghayaha Caafimaadka\)](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya), goobaha daryeelka caafimaadka iyo goobaha daryeelka muddada dheer ayaa ah goob kasta oo guud ama gaar loo leeyahay oo aasaasi ahaan loo isticmaalo in lagu siiyo dadka adeegyada daryeelka caafimaadka ee fool-ka-foolka ah, walow ay jiraan meelo laga soo reebayo. Haddii ay kutaalo goob aasaasi ahaan loo isticmaalo in lagu bixiyo adeegyada daryeelka caafimaadka, sida isbitaal, markaa goobta dhan waxay noqoneysaa goobta daryeelka caafimaadka ama goobta daryeelka mudada dheer, oo waxaa qasab ah in lagu xirto waji daboolka guud ahaan xarunta, iyadoo la dhawrayo amarka khuseeya kareebitaanada iyo kadhaafitaanada waji daboolka. Haddii ay kutaalo goob aasaasi ahaan loo isticmaalo hawlo kale, sida farmashi kudhex yaalo dukaanka raashinka ama xafiiska kalkaalinta dugsiya, goobta daryeelka caafimaadka ama goobta daryeelka mudada dheer waxaa aasaasi ahaan loo isticmaalaa in lagu bixiyo daryeelka caafimaadka, laakiin ma ahan goobaha kale ee katirsan xarunta. Waxaa qasab ah in lagu dhex xirto waji daboolada gudaha goobaha aasaasi ahaan loo isticmaalo in lagu bixiyo daryeelka caafimaadka, iyadoo la dhawrayo amarka khuseeya kareebitaanada iyo kadhaafitaanada waji daboolka. Ilaa in looga saaro hoos mooyee, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka waxaa kamid ah shakhsiyaadka leh aqoonsiyada kuqoran liiska [Shuruudaha Aqoonsiga Xirfadlayaasha Daryeelka Caafimaadka](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) iyo sidoo kale shakhsiyaadka uu sharcigu u oggol yahay inay bixiyaan adeegyada daryeelka caafimaadka iyagoo aanan haysan aqoonsi. **Dhammaan shaqaalaha iyo soo booqdayaasha, marka lagu daro xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka, ayaa looga baahan yahay inay xirtaan afxirka marka ay kujiraan goobaha gudaha ah ee kuyaalo goobaha daryeelka caafimaadka dhexdooda.**

Waxa soo socdo waa liis aanan gaar ku ahayn goobaha daryeelka caafimaadka iyo goobaha daryeelka muddada dheer:

- Xarumaha daryeelka degdega ah, oo ay kujiraan, laakiin aanan ku koobneyn, isbitaalada;
- Xarumaha daryeelka degdega ah ee muddada dheer;
- Xarumaha baxnaaninta bukaan-jiifka;
- Xarumaha caafimaadka habdhaqanka bukaan-jiifka, oo ay kujiraan, laakiin aanan ku koobneyn, xarumaha qiimeynta iyo daaweynta, xarumaha dadka lagu daaweeyo ee goobaha dadku dagan yahay ah, xarumaha ammaanka ah ee dadka looga saaro daroogada kujirto jirkooda.
- Xarumaha dadka lagu daaweeyo ee kuyaalo goobaha dadku dagan yahay ee mudada dheer, oo ay kujiraan, laakiin aanan ku koobneyn, guryaha dadka lagu xanaaneeyo, xarumaha caawinta nololaha, guryaha qoysaska dadka waaweyn, goobaha bulshadu dagan tahay ee lagu bixiyo adeegyada iyo taageerooyinka la aqoonsan yahay, iyo xarumaha adeegyada xoojinta ah;
- Rugaha caafimaadka ee guurguura ama gawaarida kale ee lagu bixiyo daryeelka caafimaadka;
- Xarumaha bukaan-socodka, oo ay kujiraan, laakiin aanan ku koobneyn, xarumaha sifeynta kelyaha, xafiisyada dhakhaatiirta, iyo xarumaha caafimaadka habdhaqanka (oo

ay kujiraan xafiisyada dhakhaatiirta dhimirka, la-taliyayaasha caafimaadka dhimirka, iyo xirfadlayaasha ku tukhasusay cilladaha kadhaha isticmaalka daroogada);

- Xarumaha ilkaha iyo takhasuska ilkaha;
- Xarumaha cabbirka araga indhaha iyo daaweynta xanuunada araga indhaha;
- Farmashiyada (oo aysan kujirin meelaha tafaariiqda);
- Xafiisyada daaweynta daliigista (tani waxaa kujira goobaha cayiman ee lagu sameeyo daliigista ee kudhex yaala goobaha aanan ahayn daryeelka caafimaadka sida goobaha la isku daliigo ee badqabka/jirdhiska loo aado);
- Xafiisyada daaweynta kala-goosyada jirka;
- Xarumaha umulisinimada iyo dhalimada umulisooyinka kaligood ah;
- Xarumaha takoorka iyo/ama karantiilka;
- Xarumaha qaliinka isla maalintaas xarunta laga baxol;
- Xarumaha daryeelka degdega ah;
- Xarumaha daryeelka dadka nolosha kaquustay; iyo
- Goobaha daryeelka caafimaadka guriga, daryeelka guriga, daryeelka gaarka shakhsi ahaaneed, ama daryeelka dadka nolosha kaquustay ay adeegyada bixiyaan bixiyayaal lacag lagu siiyo.

Goobaha daryeelka caafimaadka iyo goobaha daryeelka muddada dheer kuma jiraan:

- Goobaha lagu qabto dhacdooyinka isboortiga iyo daawashada ama isu imaatinada kale (oo ay kujiraan marka tababarayaasha aqoonsiga haysta ay daryeel siinayaan ciyaartoyda), aanan ka ahayn goobaha aasaasi ahaan loo isticmaalo in lagu bixiyo adeegyada daryeelka caafimaadka, sida goobaha gurmada degdega ee koowaad ee la cayimay (kuwaasoo ah goobaha daryeelka caafimaadka);
- Guryaha lagu koriyo ilmaha ee shatiga kahaysta Department of Children, Youth & Families (DCYF, Waaxda Carruurta, Dhallinyarada & Qoysaska)-ee aanan aasaasi ahaan lagu bixin adeegyada daryeelka caafimaadka;
- Xarumaha cilmibaarista ee aanan wax daryeel caafimaad ah lagu bixin;
- Goobaha daryeelka caafimaadka xoolaha;
- Goobaha hay'adaha ilaaliya xayawaanada;
- Goobaha dadyowga banii'aadanimada aanan macaash doonka ahayn; iyo
- Goobaha laga bixiyo tafaariiqda Marijuana, oo ay kujiraan meelaha adeegyada la-talinta caafimaadka Marijuana lagu bixiyo.

Haddii xarunta daryeelka caafimaadka ay u baahantahay in afxirka lagu xirto bannaanka, waa inaad u hoggaansantaa xeerarka shaqadooda. Ka eeg macluumaadka [“shuruucda goobta”](#) ee kor kuxusan si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Fadlan booqo bogga [Kahortagga Caabuqa COVID-19 ee Goobaha Daryeelka Caafimaadka dhexdooda](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) si aad u hesho tilmaan faahfaasan oo ay kujirto [tilmaanta xakameynta isha](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) iyo tilmaanta kusaabsan soo booqashada xarumaha caafimaadka qaarkood.

Shuruucda Goobta

Ganacsiyada, ururada, xarumaha, iyo tasiilaadyaduba waxay xaq u leeyihiin inay dejistaan xeerarkooda u gaar ah ee ku saabsan xirashada maaskarooyinka marka ay joogaan

tasiilaadkooda ama xaruntooda. Meheradaha waxaa looga baahanyahay inay raacaan dhammaan shuruudaha ku jira [tilmaamaha L&I](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya) waxayna dooran karaan inay ooga baahdaan maaskaro goobaha dhexdooda (sida, meelaha bannaamaha) si ay u noqdaan kuwo ka difaacis badan [Amarka Afxirka ee Xoghayaha Caafimaadka](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya).

Saraakiisha caafimaadka dadweynaha ee maxalliga ah ayaa sidoo kale laga yaabaa inay meel mariyaan amaro maaskaro oo badan oo ilaalin ah si loo xadido gudbinta/faafida bulshada dhexdeeda. Xeerarkaan waxay noqon karaan kuwo ka difaacis badan marka loo eego [Amarka afxirka ee Xoghayaha Caafimaadka](#) (ku qoran Af-Ingiriis oo kaliya), laakiin ma noqon karaan kuwo ka difaacis yar.

Intaa waxaa dheer, shakhsiyaadka qaarkood ayaa ubaahan kara, ama dooran kara, inay sii wataan xirashada afxirka. Waxay xaq u leeyihiin inay doortaan inay kuxirtaan afxirka goobaha fagaaraha dhexdooda xitaa marka awaamiirta dadweynaha ama maxalliga ah aanay shaqeyneynin. Fadlan ixtiraam dookhooda ay kuxiranayaan afxirka si ay u ilaaliyaan naftooda, qoyskooda iyo bulshadooda. Ogsoonow haddii aad doorato inaad afxirka xirato in lagu weydiin karo muddo kooban inaad iskabixiso afxirka marka la joogo xaaladaha sida kuwa laga leeyahay ujeedooyinka aqoonsiga.